Ardayda Ingiriisiga sidii luqadda labaad (ESL) iyo Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria (Victorian Essential Learning Standards).

Horudhac

Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria (oo loo yaqaan VELS ama 'Heeraka'. Heerarku waxay sheegayaan heerarka dowlad-goboleedka oo dhan oo laga filayo ardayda dhigata Bareebka ilaa Sannadka 10aad ee dugsiyada Victoria. Waxay kaloo sheegayaan waxyaalaha muhiimka u ah ardayda inay bartaan iyo inay fahmaan inta waqtigooda ay dugsiga joogaan. Heerarka waxaa dugsiyada looga adeegsadaa sidii loo qorshayn lahaa wax-barashada ardayga, loo qiimayn lahaa horumarka ardayga ama loogu warbixin lahaa waalidiinta.

Sidee ayaa Heerarka loo habeeyaa?

Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria Waxaa lagu muujiyaa saddex qaybood oo muhiim ah. Waxayna kala yihiin:

- **Wax-barashada Jir-dhiska, Shakhsiyeed ama bulshadeed (Physical, Personal and Social Learning):** Waxbarashada Caafimaadka iyo Jir-dhiska, Horumarinta Shakhsiyadeed, Wax-barashada Shakhsiyadeed; iyo Barashada Madanimada iyo Muwaadinimada
- **Wax-barashada Maaddada ku-salaysan:** Ingiriisiga; Sayniska; Xisaabta; Insaaniyadda; Luqadaha; iyo Farshaxanka
- **Wax-baashada Isku-dhafka ah:** Xirfadaha kale ee muhiimka ah kuwaas oo ku jira maaddooyinka manhajka, wada-xiriirka, Naqshadaynta, Hal-abuurka iyo Taknolojiyadda; iyo Hababka Fikriga ah.

Maaddooyinkaas oo dhan badanaa waxaa lagu bartaa dugsiyada, hase yeeshee mar kasta si dhow uguma xirnayn maaddooyinkii hore. Isku xiriddoodu waxay xoogga saaraysaa qiimahooda iyo habboonaantooda waxbarashada ardayga.

Sidee ayey Heerarku ugu aadaan heerar sannadeedka?

Qiyaasaha Heerarku waxay ula xiriiraan heerar sannadeedka siyaabahan soo socda:

Qiyaasaha Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria	Heerka 1aad	Heerka 2aad	Heerka 3aad	Heerka 4aad	Heerka 5aad	Heerka 6aad
Heerar Sannadeedka	Dhammaadka Breebka	Dhammaadka Sannadka 2aad	Dhammaadka Sannadka 4aad	Dhammaadka Sannadka 6aad	Dhammaadka Sannadka 8aad	Dhammaadka Sannadka 10aad

Sidee ayaa Heerarka loogu adeegsadaa warbixinta?

Warbixinaha la siiyo waalidiinta waxay muujinayaan waxqabadyada ardayda ayadoo loo eegayo Heerarka. Kaararka warbixinta ee qiyaasta A ilaa E waxay kuu sheegaysaa sida ilmahaagu ugu horumarayo marka loo eego heerarka laga filayo. Tusaale ahaan qiyaasta 'C' macnaheedu waa in ilmahaagii uu marayo heerkii laga filayey.

Qiyaasta warbixintu waa sidan:

A – si aad ah ayuu uga sarreeyaa heerkii laga filayey hadda sannadkan

B – wuu ka sarreeyaa heerkii laga filayey hadda sannadkan

C – wuxuu joogaa heerkii laga filayey hadda sannadkan

D – wuu ka hooseeyaa heerkii laga filayey hadda sannadkan

E – Si aad ah ayuu uga hooseeyaa heerkii laga filayey hadda sannadkan.

Ardayda u baranaysa Ingiriisiga sidii luqad labaad (ESL) iyo Heerarka

In kastoo ardayda ESL-ku ay hore u lahaayeen aqoon iyo xirfado luqaddooda kowaad, waxay u baahan doonaan inay Ingiriisiga bartaan si ay u muujiyaan waxay yaqaaniin iyo inay sii wataan inay wax ku sii bartaan dugsiyada Australia. Ilaa ay ka bartaan Ingiriisi ku filan ma awoodaan in si habboon loogu qiimeeyo Heerarka oo dhan, gaar ahaan Heerarka Ingiriisiga.

Ingiriisiga oo sidii luqadda labaad ah (ESL) oo la socda Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria (Heerarka ESL-ka) waxaa loo adegsadaa baddalkii Heerarkii Ingiriisiga si uu u muujiyo sida ardayda ESL-ka ay horumar uga samaynayaan barashada Ingiriisiga. Heerarka ESL-ka waxaa loo adeegsan karaa baddalkii Heerarka Ingiriisiga si loo qiimeeyo oo looga warbixiyo waxbarashada horumarka ardayda.

Heerarka ESL-ka waxaa loo habeeyey Marxalado muujinaya horumarka ardayda ESL-ka, siyaabahan soo socda:

Marxaladaha A	Sannadaha Breebka ilaa 2aad	2 Marxaladood	A1 iyo A2
Marxaladaha B	Sannadaha 3aad ilaa 6aad	3 Marxaladood	B1, B2 iyo B3
Marxaladaha S	Sannadaha 7aad ilaa 10aad	4 Marxaladood	S1, S2, S3 iyo S4

Ardayda aan lahayn xirfadaha akhris-qoraalka ee luqaddooda kowaad waxay ku bilaabaan barashada Ingiriisiga Marxaladaha BL ama SL.

Ua faailoa atu e le ata o i lalo laasaga.



Shaxdu waxay muujinaysaa sida ardaydu horumar uga samaynayso marxaladaha ESL-ka si ay u sameeyaan u-gudbidda qiyaasaha Heerarka Ingiriisiga.

Mararka qaarkood ardaydu waxay gaaraan marxalad halkaas oo xirfadaha luqaddooda Ingiriisigu ka bilaabato si ay ugu aado qiyaasaha Heerarka Ingiriisiga laga filayo (ka dib Marxaladaha A2, B3 ama S4). Marxaladan oo kale macalimiinta ilmahaagu waxay bilaabi doonaan inay ka warbixiyaan horumarkooda ayagoo adeegsanaya heerarka Ingiriisiga. Waqtiga ay ku qaadanayso ilmahaaga inuu gaaro marxaladan way kala duwan tahay hadba ayadoo ku xiran da'dooda, waxbarashadoodii hore, iyo inta uu le'eg yahay Ingiriisiga ay yaqaaneen markii ay yimaadeen Australia.

Sidee ayey u ekaanaysaa warbixinta ilmahayga ee ESL-ka?

Warbixinta ESL-ka ilmahaaga waxay macluumaad kaa siinaysaa marxaladda ESL-ka ee ilmahaagu marayo.

Macalinka ilmahaagu wuxuu awoodi doonaa inuu macluumaad badan kaa siiyo wax ku saabsan horumarka ilmahaaga marka la gaaro kulannada waalidka-macalinka, oo uu ku jiro ka-wada-hadalka ku saabsan shaqadii ilmahaaga uu samaynayey, wixii ilmahaagu ka qabtay wax-barashadooda, meesha ay u baahan yihiin in laga hagaajiyo , waxa uu dugsigu doonayo inuu ka caawiyo ilmahaaga mustaqbalka, iyo waxa aad guriga ka qaban karto si aad ilmahaaga ugu caawiso inuu wax-barto.

Sidee ayey u-e'g tahay warbixinta ilmahayga ee maaddooyinka wax-barashada oo aan ka ahayn Ingiriisiga oo sidii luqad labaad ah (ESL)

Horumarka ilmahaaga ee ka jira maaddooyinka wax-barashada oo aan ka ahayn Ingiriisiga waxaa looga warbixin karaa ayadoo la adeegsanayo qiyaasta A ilaa E oo horay loo soo sheegay, haddii ay ku habboon yihiin. Dugsiga ilmahaaga wuxuu adeegsan karaa habab kale oo uu kuugu sheego horumarkooda, sida foomamka warbixinta shakhsiga ah, haddii aysan weli habboonayn in la adeegsado qiyaasta A ilaa E.

Macalinka ilmahaaga wuxuu tixgelin doona in ilmahaagu weli baranayo Ingiriisiga marka ay ka warbixinayaan horumarkooda. Waxay garanayaan markii ay ardaydu ku cusub yihiin Ingiriisiga, badanaa waxaa ku adag inay muujiyaan wixii ay soo barteen ama soo fahmeen. Sababtaas darteed, macalimiintu waxay adeegsadaan nashaadyo qiimayn oo kala duwan kuwaas oo u ogolaada ardayda ESL-ka siday u muujin lahaayeen aqoontooda, xataa marka ay hayso xadidnaanta xirfadahooda luqadda Ingiriisiga.

Macluumaad Dheeraad ah

Waxaad Ingiriisi uga akhrin kartaa dokumantiyada VELS http://vels.vcaa.vic.edu.au/essential

Ka eeg http://vels.vcaa.vic.edu.au/links/general.html wixii baroosharada waalidka ah ee ku saabsan VELS kuna qoran 14 luqadood oo aan ka ahayn Ingiriisi.

Waxaad halkan ka akhrin kartaa kaararka warbixinta ardayga oo ku qoran luqadaha qaarkood oo aan Ingiriisi ahayn http://www.sofweb.vic.edu.au/studentreports/about.htm#communitylanguages

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyada ESL-ka ee ka jira dugsiyada Dowlad-goboleedka ee Victoria ka eeg http://www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl

La xiriir dugsigaaga si aad u ogaato sida ay wax u baraan ama u qiimeeyaan ardayda ayadoo la raacayo Heerarka Waxbarashada Asaasiga ee Victoria

Wixii koobiyo ama nuqullo ah oo ku saabsan daabacaddan ee luqadaha kale ah ka eeg http://www.sofweb.vic.edu.au/lem/esl/einter.htm